



Seattle

# Furitaanka goobtaada ganacsi ee cusub

Baro sida loo dhamaystiro dayactirka ama mashruuca dhismaha iyo sida loo furo meherad dhismo ahaan ku dhex-taala Seattle. Hagahan wuxuu faahfaahinayaa tillaabooyinka lagu furo goob ganacsi oo cusub ama dib u habeyn lagu sameeyo meherad.



## Qorshaynta mashruucaaga

Waqtiyada iyo kharashyadu waxay ku xiran yihiin mashruucaaga. Liiska hoose waa wakhti la soo jeediyay, laakiin mashruucaagu wuxuu qaadan karaa waqti ka badan ama ka yar.

## Ugu yaraan hal sano ka hor inta aan la furin: Hel goobta saxda ah

### Raadi goobaha

- Soo hel dallaal kaa caawiya inaad hesho meel aad rabto.
- Kala hadal [kooxda ganacsiga xaafadda](#) meesha aad rabto.
- Lacag [u hel mashruucaaga](#).
- Ka hel [Cilmi-baaris caawimaad oo bilaash ah](#) shaqaalaha Magaalada Seattle si aad wax uga ogaato meesha loo isticmaali karo iyadoo lagu saleynayo oggolaanshaha hadda jira iyo goobta.

### Ka gorgortan heshiiska ijaarkaaga

- Kala hadal kireeyaha [wargadda ujeedada](#).
- Hel qareen kaa caawiya gorgortanka heshiiskaaga.
- Kireyso naqshadeeye dhismeed si uu u qiyaaso inta dib u habeyntu ku kacaysa.
- Hel qareen kaa eega heshiiskaaga ka hor inta aanad saxiixin.

## Ugu yaraan sagaal (9) bilood ka hor inta aan la furin: Hel ogolaansho

### Nakhshad iyo qorshe

- Dhammeystir qorshooyinka naqshadeeyahaaga.
- Hel miisaaniyad la cusboonaysiiyay, oo ay ku jiraan alaabta meesha, qalab dhejin, iyo kharashyada qalabka.



## Seattle

- La hadal qandaraasle shati haysta oo samee jadwal mashruuc iyo qiyaasta kharashka.

### Codso rukhsado

- Isku diiwaangeli [Tababarka Oggolaanshaha](#) si aad u ogaato nooca oggolaanshaha aad u baahan doonto.
- Haddii meheraddaadu ay ku oolli doonto [degmo taariikhi ah](#) ama [dhismo taariikhi ah](#), waxaad u baahan doontaa inaad hesho [Oggolaanshaha Shahaadada Ilaalinta Goobaha Taariikhiga Ah](#)
- Haddii aad samaynayso wax dhisid ama dib-u-dayactir ah, naqshadeeyahaagu ha dalbado oggolaanshaha dhismaha.
- Haddii aad furayso ganacsi cunto, hel qorshahaaga adeegga cuntada oo uu eegay banraamijka Public Health – Seattle and King County's (PHSKC) [Food and Facilities](#).
- Waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahato oggolaansho laga helo barnaamijka [Tuubooyinka iyo Gaaska](#) ee King County.
- Codso rukhsado kale oo ku xidhan waxaad uga baahan tahay ganacsigaaga, sida shatiga khamriga ama oggolaanshaha tabbeellaha.

### Lix (6) bilood ka hor furitaanka: Dhismaha

- Hubi in adiga iyo qandaraaslahaagu aad haysataan dhammaan ruqsadaha ka hor intaadan bilaabin dhismaha
- Qandaraaslahaaga dib ula eeg jadwalka dhismaha
- Ogow kuwa kormeerada aad adigu ballami doontid iyo kuwa qandaraaslahaagu ballamin doono

### Saddex (3) bilood ka hor inta aan la furin: Kormeerrada

#### Ballami Kormeerrada

- [Kormeerrada shaqada dhismaha ka hel](#) Waaxda Dhismaha Iyo Baaritaanada ee Seattle iyo Waaxda Dab Damiska ee Seattle.
- Hel [wixii rukhsad ah oo kale oo aad uga baahan karto Waaxda Dab Damiska ee Seattle](#), sida oggolaanshaha isu-imaatinka makhaayadaha leh 100+ qof
- Haddii loo baahdo, ka hel kormeerro King County Public Health si aad u hesho kormeerrada adeegga cuntada iyo tuubooyinka iyo gaaska.
- Dhammaan kormeerada ka dib, hel kormeerka ugu dambeeya si aad u hesho Shahaadada Tirada Joogista.

Haddii aad u baahan tahay caawimo, tarjumaad, taageero naafo, ama macluumaad qaab kale lagu soo bandhigo, kala xiriir xafiiskayaga [\(206\) 684-8090](tel:2066848090) ama iimeel-garee [OED@seattle.gov](mailto:OED@seattle.gov).